

# Sida loo isticmaalo aaladda lagu raadiyo helitaanka tallaalka Kofid-19.

## TRANSCRIPT

Habka helida goobta talaalka KOFID-19 ee gobolka Minnesota waa mid dhaqsa ah oo si fudud aad ku helayo goobta kuugu dhow ee talaalka.

Waxaa jira goobo talaalka KOFID-19 ah oo ku yaal dhammaan gobolka Minnesota oo ay ku jiraan farmashiyayaal, iyo goobaha caafimaadka ee maxaliga ah.

Aad bogga dawladda Minnesota ee KOFID-19, guji badhanka Find Your Vaccine.

Gali xogtaada sida magaalada ama cinwaanka guriga, masaafada aad safrayso inta ay le'egtahy, da'daada, talaal nooce ah ayaad raadinaysaa sida xoojiyaha nooca cusub.

Uma baahnid in aad buuxisid dhammaan sanduuqyada si aad u raadsatid goobaha.

Sidoo kale waxaad baari kartaa goobaha qaar ee bixiya adeegyada qaaska ah sida baarkina la heli karo ama caawinaad dhanka luuqada ah.

Markaad gujiso calaamada I tus natijada, khariirada ayaa is cusboonaysiinaysa si ay kuu tusiso goobaha ku habboon ee aad raadinayso.

Waxaad ku dhufan kata dhibicda khariidada korkeeda si aad u aragto xogta goobta.

Khariirada hoose waxay sidoo kale ka koobantahay liiska dhammaan goobaha aad raadinaysid.

Goob kasta waxay leedahay liis ay ku qornayhiin xogta sida saacadaha shaqada, fursadaha talaalka ay haystaan, caawinta baahida gaarka ah iyo haddii aad ballan samaysanayso ama aad imaanayso ballaan la'aan.

Haddii aad u baahantahay in aad ballan samaysato, wac ama gal bogga xaruntaas.

Wixii xog dheeri ee ku saabsan KOFID-19 iyo goobaha talaalka, booqo halkaan MN dot gov backslash COVID 19.

Minnesota Department of Health  
Communications Office  
PO Box 64975  
St. Paul, MN 55164-0975  
651-201-4989  
[health.communications@state.mn.us](mailto:health.communications@state.mn.us)  
[www.health.state.mn.us](http://www.health.state.mn.us)

1/27/23 (Somali)

*Si aad u hesho macluumaadkan oo qaab ka duwan ah, wac: 651-201-4989.*